

## 6 Waxyaabood oo ay Tahay in laga Ogaado Heerka Qalinjabinta

### Waa maxay heerka qalinjabinta?

Celcelis ahaan boqolkiiba ardayda qalinjabisay afar sano gudahood kadib markii ay galeen fasalka sagaalaad iyo boqolkiiba ardayda qalinjabisa shan ama lix sano gudahood kadib galista fasalka sagaalaad.

### Waa maxay sababta heerka qalinjabintu muhiimka u tahay?

Ku guuleysiga diblooma waa guul weyn waxay calaamad u tahay hadaf wayn oo nolosha ardayga ah. Cabbirkan waxqabadku wuxuu diyaariyaa bartilmaameed qalinjabin oo sannadle ah oo loogu talagalay tirada ardayda ku qalinjabinaya "wakhtigii loo qabtay" Maine gudaheega, iyo sidoo kale ardayda wax kale ku qalinjabinaysa laakiin heer la aqbali karo ah.

### Waa maxay bartilmaameedka qalinjabinta sannadlaha ah?

Himilada muddada-dheer ee heerka qalinjabinta afarta sano ah waa in 90% ardaydu qalinjabiso afar sano gudahood kadib markay galaan fasalka sagaalaad. Himilada muddada-dheer ee heerka qalinjabinta wakhtiga la dheereeyey waa in 92% ardaydu qalinjabiso muddo shan ah ama lix sano ah gudahood ee markii ay galeen fasalka sagaalaad.

### Waa maxay sababta Maine ugu dhabbogalaysaa heerka qalinjabinta?

Xeerka Arday Kasta Ha Guulaysto (ESSA) ee fedaraalku wuxuu dhigayaa in gobol kastaa uu leeyahay nidaam isla-xisaabtan oo uu kujiro heerka qalinjabinta oo ah tusiye horumarka iyo guusha dugsiga.

### Xaggee ay xogtu ka timaadaa?

[Xogta qalinjabinta](#) waxaa si sannadle ah looga soo ururiyaa dhammaan ardayda dhigata dugsiyada dadwaynaha waxaana soo ururisa Waaxda Waxbarashada ee Maine.

### Sidee ayay uga muuqan doontaa kaadhka warbixinta dugsiga?

Dugsigu gabi ahaantii wuxuu heli doonaa cabbir waxqabad oo la xidhiidha arday kasta gaarkiisa kuwaasi oo buuxinaya bartilmaameedka qalinjabinta sannadlaha ah.